

# FoodShare



## WISCONSIN

A Recipe for Good Health



## Kaarkaaga QUEST ee Wisconsin YOUR WISCONSIN QUEST CARD

### Waa maxay Kaarka QUEST ee Wisconsin?

Kaarka Wisconsin QUEST waa mid amaan ah si fududna aad ugu isticmaali karto macaashka FoodShare. Waxa aad u adeegsanaysaa inaad cunto kaga iibsato dukaanada ka qeyb qaadanaya FoodShare. Waxa uu la mid yahay kaarka bangiga ee magacaaga iyo lambarka ku qoran yahay dusha sare waxaa kaga dhagan calaamadda Wisconsin QUEST.



Waa in aad wadataa kaarka QUEST marka aad tagto dukaanka si aad cunto uga iibsato macaashka FoodShare.

Sidee ayaan u isticmaali karaa kaarka QUEST?

Lacagta cuntada waxaa lagu shubaa xisaab si elektaroonik ah ee FoodShare oo lagu magacaabo nidaamka (EBT). Marka lacagta laguugu shubo, waxa aad isticmaali kartaa kaarka QUEST si aad cunto uga iibsato dukaanada ama beeraleyda qaata lacag bixinta EBT. Si aad kaarka uga bixiso, ku xoq kaarka

QUEST makiinadda lacag qabtaha dukaanka oo geli lambarkaaga sirta ah.

Bil kasta, waxa aad isticmaali kartaa kaarka QUEST intii aad doonto. Marka aad isticmaasho kaarka QUEST:

- Ma jiro xad ugu yar oo lagu goyn karo inaad ka bixiso.
- Lacag laguma saari karo si aad wax ugu iibsato.

Waxa aad ku iibsan kartaa cuntada soo socota:

- Rooti iyo siiryaal.
- Khudaarta iyo fawaakihada.
- Hilib, kaluun iyo digaag.
- Oonta xoolaha.
- Dhirta iyo miraha la beerto ee cuntada qoyska laga saaro.

Waxyaabaha **aa**dan ku iibsan karin lacagta cuntada lagu siiyo:

- Waxyaabaha aan raashinka aheyn (cuntada xayawaanka, warqadaha, saabuunta, alaabada guryaha, alaabada timaha, cadayga, waxyaabaha la isku qurxiyo, iwm).
- Khamriga, alkolada, sigaarka ama tubaakada.
- Cuntada diyaarsan ee dukaanka lgu dhex cuno.
- Cuntada kulul (cuntada la kariyey ee dukaanka lagu cuno).
- Daawada iyo fitimiinada.

Sidoo kale uma isticmaali kartid kababkaaga si aad ugu bixiso fiiga deebaajiga weelasha, sida koobka caanaha iyo daasadaha kale ee sharaabka fudud lagu qaato ee la celiyo ama quraaradaha Wisconsin. Gobolada kale waxa laga yaabaa inay leeyihiin sharcio u baahan in la bixiyo fiiga deebaajiga. Gobolada noocaas ah, kabkaaga waxaad u isticmaali kartaa inaad ku bixiso fiiga.

## Waa Maxay Lambarka Qarsoodiga ah (PIN)?

Marka uu ku soo gaaro kaarka QUEST, waxaa la socda macluumaad sheegaya sida aad ku garan karto lambarka sirta ah. Waxa aad u baahan tahay PIN si aad u isticmaasho kaarka QUEST. Marka aad dooraneyso PIN, dooro afar lambar oo aad xasuusan karto laakiin dadka kale ku adag tahay in ay heli karaan. Meel qarsoodi ah ku keydin lambarkaaga PIN. Lambarkaaga PIN ha ku dul qorin kaarka QUEST ama galka kaarka, hana ku keydin PIN boorsadaada. Marka uu qof ogaado lambarka sirta ah (PIN) oo aad siiso kaarka QUEST, waxa uu isticmaali qeyb ama gebi ahaan lacagta kuugu jirta. Lacagta lagala baxay cidina kuuma celineyso.

## Maxaa yeelayaa haddii aan hilmaamo PIN?

Haddii aadan xasuusan PIN, soo wac adeegga macaamiisha ee QUEST ee 1-877-415-5164 oo dooro PIN cusub. Waxa kale oo aad dooran kartaa PIN cusub haddii aad is leedahay qof ayaa helay PIN kaaga. Haddii aad PIN qalad ah geliso adiga oo jooga dukaanka, laba jeer ayaad fursad u heysataa in aad geliso PIN saxa ah. Haddii aadan gelin numberka PINka ee saxa ah sadex jeer, kaarkaagu wuu is xirayaa mana isticmaali kartid ilaa maalinta xigta.

## Goorma ayaa lacagta lagu shubayaa xisaabta?

Bil kasta oo aad ka diiwaan gashan tahay FoodShare, macaashka si toos ah ayaa loogu shubayaa xisaabta FoodShare. Taariikhda lacagta lagu shubayo waxa ay ku xiran tahay siddedda lambar ee lambarkaaga Bulshada (SSN).

Sideeda Lambar ee SSN	Maalinta lacagta FoodShare aad ku isticmaali karto kaarkaaga QUEST
0	2aad
1	3aad
2	5aad
3	6aad
4	8aad
5	9aad
6	11aad
7	12aad
8	14aad
9	15aad

Lacagta waxa aad isticmaali kataan taariikhda kor ku xusan, xitaa haddii ku soo aado fasaxa todobaadka ama fasaxyada.

## Sidee ku ogaan karaa inta ku jirta kaarka?

Lacagta ku jirta xisaabta FoodShare inta aadan adeegan waxa aad ku ogaan kartaa:

- Adiga oo soo waca Adeegga Macaamiisha ee kaarka QUEST 1-877-415-5164 (codka) ama 711 (TTY).
- Adiga oo fiiriya lacag qabashadii ugu dambeysay.
- Adiga oo soo booqda [www.ebtedge.com](http://www.ebtedge.com) (dooro halka loogu talo galay dadka heysta kaararka oo geli lambarka kaarka QUEST).

Waa in aad ka qaadato lacag qaadasho mar kasta oo aad cunto ku iibsato kaarka QUEST. Lacag qabashada ayaad ku arkeysaa inta ku hartay kaarka. Haddii aan lagu daabacin weydiiso in lagu daabaco.

## Lacagta ma u dhigan karaa inaan isticmaalo bil kale?

Bil kasta, kaarka QUEST sida aad doonto ayaad u isticmaali kartaa inta kuugu jirtana sida aad doonto ayaad ugu adeegan kartaa. Lacagta qaarna waad uga tagi kartaa si aad u isticmaasho bilaha soo socda ee mustaqbalka. Waa inaad xusuusnaataa haddii aadan isticmaalin kaarka QUEST muddo sanad ah, lacagta ku jirta kaarka wax kabadan 274 maalmood waa lagaa celinayaa.

## Waa ayo cidda loo ogol yahay inay ku adeegato ama lacag kala baxdo kaarka?

Waxa aad dooran kartaa qof kuugu adeegga oo qoyskaaga ugu iibiya raashinka ay doonayaan. Kaarka QUEST ee lagu soo diro waxaa wehliya in qofka aad u ogolaato inuu kuugu adeego isna kaar QUEST ah oo magaciisa ku qoran loo soo dirayo oo ay xisaabta FoodShare wax ku gadan karaan.

Waxa kale oo aad dooran kartaa mid kale oo lacagta FoodShare laguugu dhiibo oo kuu maamula. Qolada kuu maamuleysa waxaa loo soo dirayaa kaar QUEST oo magacooda ku qoran yahay. Marka aad doorato qolo kale oo kuu maamusha, laguuma soo dirayo kaar QUEST oo kuu gaar ah.

La xiriir hay'adda si aad u doorato qof ku adeegi kara ama kuu maamula. Waxa aad ka noqon kartaa inaad isticmaasho kaarka markii aad doonto adiga oo soo wacaya Adeegga Macaamiisha ee QUEST ee 1-877-415-5164.

## Maxaan yeelayaa haddii uusan kaarku shaqeyneyn?

Haddii kaarka QUEST ee aad codsatay aanu shaqeyneyn, soo wac Adeegga Macaamiisha ee QUEST ee 1-877-415-5164. Haddii aad weli caawinaad u baahan tahay, la xiriir hay'adda.

## Maxaan yeelayaa haddii ay fariin qalad ah ii soo baxdo marka aan kaarka QUEST isticmaalo?

Soo wac Adeegga Macaamiisha ee QUEST 1-877-415-5164 haddii uu kuu soo qoro fariin qalad ah marka aad isticmaasho kaarka QUEST. Waxaa jira dhawr tusaale oo fariinta khaladka ah iyo sida lagu xaliyo:

- **Kaarku ma diiwaan gashana (card not on file).** La xiriir Adeegga Macaamiisha ee kaarka QUEST 1-877-415-5164.
- **PIN aan sax aheyn (invalid PIN).** Waxa aad gelisay PIN lambar khalad ah. Haddii aad geliso PIN aan sax aheyn sadex jeer, kaarkaagu wuu is xirayaa mana isticmaali kartid ilaa maalinta xigta.
- **Lacag ku filan kuma jirto (insufficient balance).** Waxa aad isku dayday inaad isticmaasho lacag ka badan tan ku jirta xisaabta.

Alaabta qaar iska celi ama lacagta dhiman ee laguugu leeyahay ka bixi jeebkaaga.

- **Kaar aan shaqeyneyn (inactive card).** Ma aadan dooran PIN La soo xiriir Adeegga Macaamiisha ee kaarka QUEST 1-877-415-5164 oo dooro PIN.

## Maxaan yeelayaa haddii kaarku iga lumo?

Marka ugu horeysa ee aad ogaato inuu kaa lumay kaarka QUEST ama lagaa xaday, la xiriir Adeegga Macaamiisha ee 1-877-415-5164. Kaarkaaga waa la tirtirayaa marka aad soo wacdo. Haddii uu qof isticmaalo ka hor inta aadan soo wicin, lacagta lagala baxo laguuma celinayo. Marka aad kaarkaaga sheegto in la xaday ama lumay, cid isticmaali karta ma jirto. Kaar laguugu bedelayo ayaa lagu soo dirayaa maalinta xigta.

Haddii kaarka QUEST kaa lumo ama la xado waa in aad bixisaa \$2.70 oo ah qiimaha kaarka laguugu bedelayo. Lacagta waxaa laga jarayaa xisabtaada FoodShare. Haddii aan xisabtaada FoodShare ku jirin lacag ku filan, lacagta waxaa laga jarayaa xisabtaada FoodShare marka lacagta ugu horeysa ku soo dhacdo oo lacag laguugu shubo. Qof kasta waxa uu xaq u leeyahay in kaarka QUEST hal mar lacag la'aan loogu bedelo sanadkiiba 1da janaayo - 31ka Diseembar.

## Maxaan yeelayaa haddii uu kaarkeyga dhaawac gaaro?

Haddii uu kaarkaaga dhaawacmo ama uu kuugu shaqeyn waayo dukaanka waa in nambarada makiinadda la geliyaa oo aad soo wacdaa Adeegsiga Macaamiisha ee 1-877-415-5164 oo aad codsataa in lagaa bedelo.

## Imisa jeer ayaa la iga bedelayaa kaarka?

Wisconsin waxaa waajib ku ah in ay la socoto inta jeer ee kaarka QUEST lagaa bedelo qof kasta oo xisaabta FoodShare leh. Haddii kaarka QUEST aad bedesho shan jeer ama wax ka badan 12 bilood gudahood waxaa suurogal ah in galkaaga loo diro Hanti Dhawrka Guud si loo fiiryo inaad FoodShare is daba marineyso.

## Sidee ayaan u ilaalinayaa kaarka QUEST?

Hoos waxaa ku xusan dhawr siyaabood oo aad ku ilaalin karto kaarka QUEST. Talooyinka waa kuwa kaa caawinaya xafididda kaarka QUEST oo yareynaya in loo baahdo in la bedelo.

- Ku xafid kaarka QUEST meel amaan ah.
- Ku xafid kaarka QUEST meel nadiif ah.
- U xafid kaarka QUEST sida aad u xafidi laheyd kaarka bangiga.
- Ha isku laabin ama jabin kaarka QUEST.
- Kaarka Quest ha ku xoqin muraayadda gaariga, wax haku furin, iwm.
- Birlabta kaarka nadiif ha ahaato kana ilaali xoqidda.
- Kaarka QUEST ku hay boorsada jeebka ama garabka.
- Ka fogee kaarka QUEST sida birlabta boorsada iyo telefishinka.
- U isticmaal sida uu kuu sheego shaqaalaha dukaanka kaarka QUEST.
- Cidna hala wadaagin PINka xitaa shaqaalaha dukaanka.
- Ha tuurin kaarka QUEST. Kaarkaaga QUEST ma laha taariikh uu dhacayo. Mid kaliya oo ah kaarka QUEST ayaad isticmaali kartaa bil kasta oo aad xaq u yeelato FoodShare.
- Haddii ay ka istaagto gargaarka aad ka hesho FoodShare, ha tuurin kaarkaaga QUEST. Haddii ay mar kale kuu bilaabanto FoodShare, waxaa laguugu shubayaa kaarkii kuugu dambeeyey ee aad isticmaashay.

## Sidee ayaan u celin karaa alaabada aan ku gato kaarka QUEST?

Si aad u celiso alaabada aad ku gadato, alaabada iyo warqadda lacag qabashada iyo kaarkaaga QUEST gee dukaanka aad ka gadatay alaabada. Kaarka ayaa lacagtaada dib loogu celinaya xisaabtaada. Macaashka markiiba wuu kuu bilaabanayaa. Lacag caddaan ah laguma siinayo.

## Sidee ayaan u saxaa khalad ku jira xisaabteyda?

Si aad u saxdo khalad ku jira xisaabtaada, soo wac Adeegga Macaamiisha ee kaarka QUEST ee 1-800-415-5164 una sheeg khaladka. Waraaq ayaa lagu

soo dirayaa go'aanka laga gaaro khaladka. Haddii aadan ku raacsaneyn go'aanka, waxa aad weydiisan kartaa dhageysi. Sida dhageysi loo codsado warqadda ayaa laguugu sheegay.

**Fiiro gaar ah:** Dukaanka ayaa laga yaabaa inuu yareyo ama kordhiyo lacagta aad kaarka QUEST wax kaga gadatay si u saxo khaladka (tusaale ahaan, khalad galay nidaamka). Waxaa lagu soo dirayaa waraaq ku saabsan isbedelka lagu sameeyey. Haddii aadan ku raacsaneyn isbedelka, 15 cisho ayaad heystaa laga bilaabo taariikhda warqadda in aad dhageysi ku codsato. Lacagta laga bedelay sideeda ayey ahaaneysaa ilaa la qabto dhageysiga oo go'aan laga gaaro.

## Maxaa la iga doonayaa haddii aan guuro?

Haddii aad qorsheyneyso inaad guurto, u sheeg hay'dda cinwaankaaga cusub. Haddii kaar laguugu diray cinwaankaagii hore, waxaa loo wareejinayaa cinwaanka cusub.

## Maxaan yeelayaa haddii aan gobol kale u guuro?

Haddii aad gobol kale u guuro, la socodsii hay'adda. Weli waad ku isticmaali kartaa gobolka kale lacagta kuugu jirta kaarkaaga QUEST ee Wisconsin. Haddii aadan heli karin dukaan qaata kaarka QUEST ee Wisconsin, la soo xiriir hay'adda Wisconsin ee bixisay kaarka FoodShare. Si aad gobolka cusub uga hesho gargaar, waa in aad halkaas ka codsataa.

## Xagee ayaan ka heli karaa macluumaad dheeraad ah?

- La xiriir soo wac Adeegga Macaamiisha ee kaarka QUEST 1-877-415-5164 (codka) ama 711 (TTY).
- Go to [dhs.wisconsin.gov/foodshare/index.htm](https://dhs.wisconsin.gov/foodshare/index.htm).

Macluumaad lagu siiyo waa mid guud. Macluumaad dheeraad ah ku saabsan FoodShare, la xiriir hay'adda.

**Hay'adaha gobalka ama deegaanka ee Barnaamijka Kaalmada Nafaqada ee Dheeraadka ah (SNAP) iyo Barnaamijka Cunta Qeybinta ee Indian Reservation (FDPIR), iyo hay'adaha la hawlgala, waa inay soo dhajiyaan Bayaanka Takoor La'aanta ee soo socda:**

Sida waafaqsan sharciga xuquuqaha madaniga ah ee federaalka iyo sharciyada iyo qaynuunada xuquuqaha madaniga ah ee Waaxda Beeraha ee Mareykanka (USDA), hay'adan waxaa ka mamnuuc ah takoorida ku salaysan isirka, midabka, asalka qaran, jinsiga, (oo ay ku jiraan, aqoonsiga jinsiga iyo nooca jinsiga), caqiidada diimeed, naafonimada, da'da, aaminsanaanta siyaasadeed, ama aargoosiga ama aargudashada hawlo hore oo xuquuqaha madaniga ah.

Macluumaadka barnaamijka waxaa lagu heli karaa luuqado aan ahayn Ingiriisiga. Shaqsiyaadka naafada ah ee u baahan qaab kale oo wada xidhiidh si ay u helaan macluumaadka barnaamijka (tusaale, Hab qoraaleedka camoolaha, daabicidda farta waaweyn, cajalada maqalka, Luuqadda Dhagoolka ee Maraykanka), waa inay la xidhiidhaan hay'adda (gobalka ama deegaanka) ee ay dheefaha ka codsadeen. Shakhsiyaadka dhagaha la', maqalka ku adag yahay ama hadalka naafo ka ah ayaa la xidhiidhi kara USDA iyaga oo u maraya Federal Relay Service (Adeegga Dadka Dhagaha la' ee Federaalka) ee lambarka (800) 877-8339.

Si loo gudbiyo dacwada takoorka ee barnaamijka, Dacwad-qabaha waa inuu buuxiyo Foomka AD-3027, Foomka Dacwada Takoorka Barnaamijka ee USDA kaas oo onleen ahaan looga heli karo barta:

<https://www.fns.usda.gov/sites/default/files/resource-files/ad3027-somali.pdf>, xafiis kasta oo USDA ay leedahay, iyada oo la wacayo (833) 620-1071, ama la qorayo warqad ku socota USDA. Warqadda waa inay leedahay magaca, ciwaanka, lambarka taleefanka ee dacwad-qabaha, iyo sharraxaad qoraal ah oo ku saabsan falka takoorka ah ee la soo eedeeyay oo faahfaahsan si loogu wargaliyo Kaaliyaha Xoghayaha ee Xuquuqaha Madaniga (ASCR) nooca iyo taariikhda xadgudubka xuquuqda madaniga ah ee la soo eedeeyay. Foomka AD-3027 ee la buuxiyay ama warqadda waa in lagu diraa;

**(1)boostada:**

Food and Nutrition Service, USDA  
1320 Braddock Place, Room 334  
Alexandria, VA 22314; ama

**(2)fakiska:**

(833)-256-1665 ama (202)-690-7442; ama

**(3)iimaylka:**

[FNSCIVILRIGHTSCOMPLAINTS@usda.gov](mailto:FNSCIVILRIGHTSCOMPLAINTS@usda.gov)

Hay'addan waa hay'ad bixisa fursad loo wada siman yahay.